



Talaabooyinka Kahortaga Halista Daran (ERPO)

Haddii aad soosheegayso xaalad degdeg ah, fadlan wac 911.

Talaabooyinka Kahortaga Halista Daran (ERPO) wuxuu kataageeraa qoyska, xubnaha qoyska iyo laamaha fulinta sharciga inay maxkamadaha ugudbiyaan dacwad ah in dadka qaba xanuunka dhimirka ama waalan laga hor istaago iibsiga ama haysashada qoryaha/hubka. Dacwad kasta oo loogudbiyo ERPO waxaa dib u eegis kusamaynaaya maxkamad si loogo'aamiyo in sababta dacwada keentay ay tahay fal rabshadeed ama keennaysa khatar ah inay naftooda ama dadka kale dhibaateeyaan.

Talaabooyinka Kahortaga Halista Daran waxay kajiraan gobalka oo dhan kumana koobna Seattle.

Maxay Talaabada Kahortaga Halista Daran samaysaa?

Talaabada Kahortaga Halista Daran waxay qofka ku amraysaa inuu dhigo hubkiisa. Waxay noqonaysaa sharci daro in la iibsado ama lahaysto qoryaha hubka. Waxay kahor istaagaysaa qofka inuu helo sharciga bistoolada qarsoodiga ah waxayna kuqasbaysaa shaqsiyaadka inay soowarejiyaan sharciga haday horay uhaysteen.

Yaa loogasoo horjeedaa talaabadaan?

Waxaa loodiidanyahay qofka keeni kara halis uuna naftiisa ama dadka kale dhaawac ugu gaysto mustaqbalka dhaw asagoo adeegyasaanaya hubka. Sababaha keeni kara halista noocaas ah waxaa kamid noqon kara falka rabshada leh, khatarna ah in qofku naftiisa waxyeelo ugaysto, dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo daran, iyo isticmaalka mukhaadaraadka iyo aalkolada. Qofka loo arko inuu khatar keenaayo waxaa loo yaqaanaa eedaysane.

Yaa dalban kara in talaabada laqaado?

Qoys ama qofka reerka kamid ah ama sarkaal kamid ah laamaha sharci fulinta ama wakaalad ayaa kacodsan kara maxkamada inay amar soosaarto ayagoo buuxinaaya foomka dacwada. Qofka

dalbanaaya in maxkamadu mamar soosarto waxaa looyaqaanaa "dacwoode." Sharcigu wuxuu qeexayaa qoys ama xubin katirsan qoyskiisa:

- qofka eedaysanaha ladhashay, isqabaan, ama islasoo koreen eedaysanaha;
- qof ay is shukaansadaan eedaysanaha;
- qof haysta ilmo wax iskugaleen eedaysanaha, ayadoo laga fiirinayn in eedaysaha isqabaan qofkaas ama ay isla noolaayeen eedaysanaha xiligay noqotaba;
- qof ladagan ama ladaganaa eedaysanaha sanadkii lasoo dhaafay gudhiisa;
- qof ay xiriir kaladhexeeyo eedaysanaha;
- qof xiriir wada dhalasho kaladhaxayso ama waalid uu uyahay eedaysanuhu, ayna kujiraan waalidiinta xaaska eedaysanaha iyo carruurta ay dhalaan iyo waalidiinta waalidka eedaysanaha iyo carruurta uu awoowaha uyahay eedaysanuhu, ama;
- qof ah ama ahaa masuulka sharciga ah ee eedaysanaha.

Haddii aadan xiriir rasmi ah lalahayn, ama aadan doonayn inaad maxkamada kadalbato inay amar soosaarto, waxaan arinta kuwargalinkarnaa booliiska ayagaana hawsha gacan kagaysanaaya.

Sidee ayaa kucodsankaraa talaabada ERPO?

Email udir ERPO@kingcounty.gov halkaasoo wakiilo iyo shaqaaluhu ay diyaar kuugu yihiin inta lagu jiro saacadaha shaqada Isniinta-Jamcada si ay caawimaad kuusiiyaan, ayna kujirto inay kuugudbiyaan laanta sharci fulinta saxda ah. (Waxaad emailka kusoo qori kartaa luuqadaada hooyo.)

Haddii aad rabto inaad dalbato amarka ERPO, wakiiladu waxay kugula talinayaan inaad qorshe amaankaaga kudifaacdo dagsato. Iskuday inaad laxiriirto mid kamid ah ururadaan bulshada ee bilaashka ah midkood si aad uhesho macluumaad dheeraad ah:

- [API Chaya](tel:(877)922-4292): (877) 922-4292
- [Asian Counseling and Referral Service](tel:(206)695-7600): (206) 695-7600
- [Consejo](tel:(206)461-4880): (206) 461-4880
- [Refuge Women's Alliance \(ReWA\)](tel:(206)721-0243): (206) 721-0243 (Afka Soomaaliga)

Soodagso oo buuxi foomka (oo kuqoran kaliya afka Ingiriisiga) si aad amarka ERPO oga dalbato [halkaan](#).

Wali suaalo ayaan qabaa.

Si aad jawaab ugu hesho suaalaha aalaaba soonoqnoqda oo laxiriira ERPO, fadlan booqo bogga [Protectionorder.org ERPO FAQ](#) (macluumaadku wuxuu kaliya kuqoranyahay af Ingiriisiga).

Bartaan waxaa kujira macluumaadka dacwoodayaasha, eedaysanayaasha, iyo mujtamaca guudba ay isticmaali karaan kuwaasoo kahadlaaya sida looga faa'iidaysto adeegga Talaabooyinka Kahortaga Halista Daran ee gobalka Washington.

Ilaha ERPO

[Washingtonlawhelp.org](#) - ood kahelayso tasmada adeegyada sharci ee lacag la'aanta loogu sameeyo dadka danyarta ah iyo duqoowda